



Folkhälsomyndigheten

Jawaabo baaritaan oo khaldan oo ah 3 700 oo baaritaan oo covid-19 ah

Laba sheybaar oo Iswiidhish ah ayaan waxay khalad ku arkeen baaritaan la sameeyo si loo muujiyo in uu qofku qabyo infekshin covid-19 oo markaas haya. Khaladkaas awgiis qaabka baaritaanka laguma kala saari karo jawaabta sheegeysa in uusan qofku cudurka qabin iyo in uu jirkiisa ku jiryo feyrus heerkiisu hooseeyo oo covid-19 ah.

Khaladkaas wuxuu keenyay in ku dhawaad 3 700 oo qof oo kala jooga sagaal gobal oo kala duduwan ay dhici karto in la siiyay jawaab ah khalad ah oo ah in uu cudurku ku dhacyay. Micnaha waxay si khalad ah u ogaadeen in ay qabaan infekshin covid-19 ah.

Dhammaan dadka jawaabta khaldan la siiyay waa lagala xiriiri doonaa wixi dhacay ugu dambeyn khamiista 27 Agoosto, waana la beddeli doona jawaabahooda baaritaanka. Maadaama ay dhawr usbuuc ka soo wareegtay marki baaritaanka la sameeyay micno sidaas u weyn ma sameyneyso in saami cusub leeska qaado. Dadka jawaabta khaldan la siiyay waxaa loo soo bandhigi doonaa in laanta caafimaadka ee gobalkiisa looga baaro antibody. Baaritaanka antibody-gu wuxuu muujin karyaa in uu kugu dhacyay covid-19 iyo in kale.

Haddii lagaa baaray covid-19 oo aan lagula soo xiriirin ugu dambeyn khamiista 27 Agoosto waxaad ogaataa in jawaabti baaritaankaagu ay sax ahayd.

Khad taleefan oo qaran ayaa la furay halkaas oo aad ka heli kartid macluumaad dheeraad.

Nambarka taleefanku wuxuu ku jiryaa macluumaadka loo dirayo dhammaan dadka jawaabta khaladka ah la siiyay.

[Su'aalo iyo jawaabo ku aaddan jawaabta khaldan ee sheegeysa in uu qofku qabyo covid-19](#)

Goballada ey khuseyso:

Blekinge

Dalarna

Gävleborg

Stockholm

Sörmland

Bogga
2 (2)

Västerbotten

Västernorrland

Västmanland

Västra Götaland